



## Waa tanaa Xirmadaada FIT

Waxaad helaysaa xirmadan baaritaanka saxarada shaybaarka (FIT) sababtoo ah **waxaa la gaaray waqtigii lagaa baari lahaa kaansarka mindhicirka (malawadka)**. Takhtarkaaga qoyska, kalkaaliye caafimaad oo xirfadle ah, baska baaritaanka ee marba meel taga ama Telehealth Ontario ayaa laga yaabaa in ay kuu dalbeen baaritaankan. Haddii aad ku nooshahay seeraha Qaranka Hore (First Nation), waxaa laga yaabaa in ay kuu dalbeen xarun caafimaad ama rugta daryeelka caafimaad.

Khatarta aad ugu jirto kaansarka malawadka waxaa ay korortaa ka-dib da'da 50 sano jir. **Waa muhiim in la sameeyo baaritaanka FIT si uu gacan ugu geysto ilaalinta caafimaadkaaga.**

Baaritaanka **FIT waa baaritaan ammaan ah oo xanuun la'aan ah** oo ka baaraya saxaradaada dhibco yaryar oo dhiig ah, kuwaas oo uu keeni karo kaansarka mindhicirka. Waxaad baaritaankan ku sameyn kartaa gurigaaga wuxuunna qaadanayaa dhawr daqiiqadood. Looma baahna in aad wax ka beddesho cuntadaada ama in aad joojiso qaadashada daawooyin si aad baaritaanka u sameyso.

Baaritaanka inta aadan sameyn ka hor, hubso in xirmadaada FIT ay ku jiraan wax kastoo aad u baahan tahay.

- Tuubada FIT
- Tilmaamaha FIT
- Ogeysiiska asturnaanta
- Warqadda lagu ururiyo ama qabto saxarada
- Bac balaastiig ah oo leh wax dhuuqa qoyaanka
- Bakhshadda lagu soo celinayo

**Ma u baahan tahay macluumaadkan oo ah qaab fudud oo la adeegsan karo?**

1-855-460-2647, TTY (416) 217-1815, [publicaffairs@cancercare.on.ca](mailto:publicaffairs@cancercare.on.ca)

**Sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah u soo celi baaritaankaaga oo dhammeystiran.** Waxaa ugu wanaagsan in aad boostada ku soo dirto ama 2 maalmood gudahooda aad ku geyso goobta laga qaado sidaa daraadeed waxaa lagu baari karaa shaybaarka 14 maalmood gudahooda. Booqo [locations.lifelabs.com](http://locations.lifelabs.com) si aad u ogaato goobaha laga qaado ee la geeyo iyo saacadaha.

Ka-dib marka aad boostada ku dirto ama aad geyso baaritaankaaga goobta laga qaado, waxaad filan kartaa in aad hesho warqaddaada natijada dhawrka toddobaad ee xiga.

Caafimaadkaagu waa muhiim. **Maanta samee baaritaankaaga FIT**

Daacadnimo,



Dr. Linda Rabeneck

Madaxweyne Ku-xigeenka, Ka-hortagga iyo Xakameynta Kaansarka

Cancer Care Ontario

Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah ama tilmaamo ku qoran luuqado kale, ka wac Cancer Care Ontario (**1-866-662-9233**) ama booqo **[cancercareontario.ca/colon](http://cancercareontario.ca/colon)**. Haddii aad dhibaato kala kulanto FIT-kaaga, ka wac LifeLabs (**1-833-676-1426**).